Ku soo dhawaw Gaadiidkan

Hagaha socdaalka Västmanland gudaheeda

Hayeh!

Hagahani wuxuu kuu sheegayaa sida loogu safro baska ama tareenka Västmanland gudaheeda, sida noolka loo bixiyo iyo noocyada kaladuwan ee tigiddhada ee jira.

Si loo sogu nabadgalyadaada iyo ta dadka kaleba wax lacag cadaan ah lagu ma qaado gaadiidka korkiisa. Waxaa jira qaabab farabadan oo kale oo aad ku iibsankarto socdaalkaaga.

Hadii aadd jeceshahay xog dheeraad ah, fadlan booqo bogayaga aad ka heli karto vl.se ama wac xarunta macaamiisha lambarkeeda **0771-22 40 00**.

Ku soo dhawaw gaadiidka

Dhaqaalaha. Cimilada wanaagsan. Haboonida.

Waxaa jira waxyaabo badan oo aad faa'iidayso hadii aad iska dayso baabuurka oo aad isticmaasho gaadiidka dadwaynaha. Waxaad kaydsanaysaa lacag markasta oo aad ku socdaasho gaadiidka dadwaynaha. Waxaa si dhibyar boorsada jeebkaaga kuugu hadhay lacag badan.

La socdaalida dadka kale waxaad door ka qaadanaysaa jawiga wanaagsan. Hadii dad badani ay isticmaalaan gaadiidka dadwaynaha, waxaa yaraanaya wasakhda gaaska hawada baabuurtu ku siidayso ee deegaanka iyo caafimaadkeenaba khatarta ku ah. Dadaal dheeri ah ayaa loo baahanyahay si loo joojiyo sibadalka cimilada, taas oo u baahan ka qayb qaadashada qof kasta. Sidaas darteed waxaan dhamaan basaskayagii duuga ahaaa ku badalaynaa kuwo casri ah, basaska baayoo gaaska. Ujeedadu waa in dhamaan basaskayagu ay ku shaqeeyaan baayoo gaas sanadku marka uu yahay 2020.

Baayooo gaasta ay baabuurtayadu ku shaqayso waxaa laga sameeyaa hambada cuntada ay qoysasku iska tuuraan, hadhuudhka la saydhay iyo baruurta iyo xaydha ay hudheeladu tureen iyo fuudka cuntada lagu kariyay. Tani waxay keenaysaa hawo nadiif ah oo ku salaysan yaraynta qiiqa hawada lagu siidaynayo ee gibilka cagaaran.

In aad nagu safarto ma aha dhaqaale ilaalin iyo habooni oo kaliya. waxaa kale oo aad ogaan sida ay u haboontahay in aad ku safarto baska ama tareenka oo aad aado iskuulka ama shaqada, goobaha raaxada ama aad uga qaybgasho cawayska madadaalada. Waxay kuu sahlaysaa wakhti aad ku fikirto.

Raadinta socdaalkaaga

Aad vl.se

vl.se waxaa jira qorsheeyeyaasha wakhtiga iyo socdaalkaba si ay dhakhso kaaga caawiyaan in aad hesho socdaalkaaga. Guji calaamada ku taala socdaalka baska ama tareenka. Ka dib gal:

- Xageed rabtaa in aad ka socdaasho, xageedse rabtaa in aad u socddaash.
- Wakhtigeed rabtaa in aad socdaasho ama aad gaadho.

Socdaal qorsheeyuhu wuxuu ku siin talo bixin ku saabsan wadada ugu haboon ee aad ku socdaali karto.

Isticmaal softiwweerkaayaga moobaylka ee “VL”

Waxaa kale oo aad softweerkaayaga moobaylka ee “VL” u siticmaali kartaa raadsiga baska aad ku socdaalayso. Waxaad ka raadin kartaa meesha qorshaha socdaalka, raadinkartaa wakhtiyada, eegi kartaa goorta uu basku istaago iyo meesha uu basku ku suganyahay, intaa waxaa dheeer, softiweerku wuxuu kuu sahlayaa in aad iibsato tigidh. *Wixii dheeraad ah ka akhri boga 11-12*.

La xidhiidh xarunta macaamiisha VL’s (KundCenter VL)

Hadii aad qabto wax su’aal ah, waxaanu gacmo furan kugu soo dhawaynaynaa in aad wacdo lambarka xarunta macaamiisha VL’s ee 0771-22 40 00.

Miyaad jeceshay in aad hesho xog dheeri ah oo ku saabsan socdaalkaaga tareenka?

→ resplus.se
→ tim.se
→ sj.se
→ resrobot.se
→ tagibergslagen.se

libsashada tigiidhkaaga

Fursadaha tigidhka

Qaybtan waxaad ka heli kartaa faah faahinta noocyada fursadaha socdaalada basaska iyo tareenada ee jira.

Wax kasta oo aad doorato, ha iloobin in aad kaydiso tigidhkaaga socdaalka oo dhan. Waxaa kale oo aad xasuusnaataa in aadan isticmaali Karin lacag si aad u bixiso noolka adiga oo baska saran.

Qiimaha hada jira iyo wax soo saaradaba waxaad ka heli kartaa vl.se ama waxaad wici kartaa lambarka xarunta macaaliisha VL's ee 0771-22 40 00.

! Tigidhkaaga gacanta ku hayso inta aadan fuulin baska ama tareeenka.

Ku socdaalida tareenka

Si aad uguu socdaasho tareenka waxaad isticmaali kartaa kaarka socdaalka (Resekortet) ama waxaad iibsan kartaa tigidh tareen oo gaar ah. Xarunta macaamiisha ee VL's ee ku taala Xarunta dhexe ee Västerås waxaad tigidhka ka gadan kartaa TiM, SJ iyo Tåg i Bergslagen. Xasuusnaw tigidhka kaliya ee VL's iyo kharashka socdaalka (reskassa) looma isticmaali karo socdaalka tareemada.

Sida loo isticmaalo Kaarka socdaalka

Kaarka VL's ee socdaalka oo lagu shubay kaarka koombiitarka, kaarka dagmada, kaarka dhalinyarada ama kaarka 10ka safar ee socdaaladda badan, waxaa loo isticmaali karaa in lagu safro tareenka socdaalo cayiman oo ku yaala dagmada Västmanland gudeheeda. *Wixii faah faahin ah ee ku saabsan kaarka socdaalka iyo nooca wax soo saarka ee aad ka doorankarto boga 14-17.*

Socdaalka tareenka, waa waajib in kaarka markasta laga diwaangaliyo mishiinka VL's ee yaala goobta ka hor inta aan tareenka la fuulin. Mishiinka tus kaarkaaga ka dib wuxuu kuu soo saari warqada cadaynta lacag bixinta.
Waxaa waajib ah in markasta aad is garab wado tigidhka iyo warqada cadaynta bixinta lacagta maadaama ay labadoodu isku yihiin tigidh dhamaystiran.

Tareemada, kaarka socdaalka waxaa ku safri kara oo kaliya hal qof safarkiiba.

Miyaad jeclaan lahayd xog dheeraad ah oo ku saabsan safarkaaga tareenka?

→ resplus.se → resrobot.se → sj.se → tagibergslagen.se → tim.se

Safarka baska

Hadii aad rabto in aad bas ku safarto waxaad dooran kartaa tigidhka halka safar oo kaliya ama kaarka socdaalka (Resekortet). Waxaad kaarka ku buuxin kartaa wax soo saarada caadiga ah ama kharashka socdaalka. Wixii faah faahin ah ee ku saabsan kaarka socdaalka iyo wax soo saarada aad ka dooran karto ka akhri bogaga (Resekortet).

Ma rabtaa in aad ku socdaasho hal tigidh?

Waxaad kala dooran kartaa in aad iibsato tigidh, tigidhka la isticmaalo 30 cisho oo aad ku bixiso baska korkiisa adiga oo adeegsanaya kaarka amaahda ama kharashka socdaalka.

Socdaalada dawlada hoose ee Västerås waxaa jiira fursado dheeraad ah

Ka akhri faah faahinta → www.vl.se/biljetter/vara-biljetter/enkelbiljetter ama wac xarunta macaamiisha VL lambarkeeda 0771-22 40 00

Iibsashada tigidhka moobaylka ee softiweerka “VL”

Softiweerka “VL” waa mid ku haboon in aad raadiso socdaalka oo aad iibsato tigidhada shaqsiga. Waad kartaa:

- Raadinta wakhtiga
- Eeg wakhtiyada uu basku istaagayo iyo meesha saxda ah ee uu marayo.
- Raadi/iibso socdaal
- Eeg kaydka tigidhada aad iibsatay
- Badalo gobalka. Softweerku wuxuu kuu sahlayaa in aad kala doorato 15 ah adeega socdaalka ee dagmooyinka.

Softweerka “VL” waa bilaash oo waxaad ka heli kartaa Appstore, Google Play ama Windows Phone Store.

Samee sidan soo socota:

1. Soo daji sooftiweerka “VL”.
2. Dooro habka bixinta lacagta. Dooro mid ka mid ah kaarka amaahda iyo kaydsiga ama rasiidka aan lahayn kharashka dheeriga ah. Waxaa lagaaga baahan yahay in tan aad hal mar uun samayso, ka hor inta aadan iibsan tigidhkaaga ugu horeeya. Si aad u isticmaasho adeega rasiidka waa khasab in aad ahaato muwaadin Swedish ah. Laakiin MasterCard’s and Visa cardiga ay haystaan ajaanibtu waa loo isticmaali karaa sooftiweerkan.
3. Iibso tigidhkaaga wakhti aan ka badnayn 20 daqiiqo ka hor inta aadan bilaabin socdaalka. Ka dib waxaad ka heli tigidhka aad iibsatay ”Tickets” hoosteeda.

Xasuusnaw mudada xawilaada tigidhkaagu waxay ka bilaabmaysaa isla wakhtiga aad iibsataba.

Iibso tigidhka halka ruux ee 30ka cisho

Waxaad iibsan kartaa tigidhka halka ruux isticmaalo 30ka cisho ee aad ka iibsatay VL’s xarunteeda macaamiisha, wakiilada adeega buuxa ee VL’s iyo bogayga (Mina Sidor) ku yaala vl.se. tigidhku wuxuu shaqayn karaa oo kaliya marka aad fuusho baska ee aad tusto mishiinka tigidhka akhriya.

Marka tigidhku uu shaqeeyo, wuxuu leeyahay mudo xawilaad oo u dhaxaysa 1-2.5, iyada oo loo eegayo jidka aad ku socdaalayso. Waydii dirawalka hadii aadan hubin waxyaabaha ku saabsan tigidhkaaga.

Xasuusnaw waxaad adigu ka masuul tahay in tigidhkaaga mishiinku akhrin karo marka aad rabto in aad isticmaasho.

Baska ku dul bixinta

Waxaad tigidh hal socdaal ah ku bixin kartaa kaarka amaahda ama kaydsiga baska korkiisa. Waxaa kale oo aad isticmaali kartaa kharashka socdaalka si aad ugu bixiso hadii aad ku shubatay kaarkaaga socdaalka (Resekortet).

Xadidaada tigidhka

Waxaad u baahantahay tigidh shaqaynaya si aad u socdaasho. Ha iloobin in aad kaydiso tigidhkaaga si aad ugu socdaasho safarkaaga oo dhan. Hadii aad ku socdaalayso tareen waa in aad kaarkaaga socdaalka ka diwaangaliso mishiinka VL's ee yaala meesha inta aadan fuulin. Rasiidka iyo kaarka socdaalkaba xafid maadaama ay hal tigidh ahaan u wada shaqaynayaan. Hadii aad awoodi waydo in aad tusto daba galayaasha tigidh shaqaynaya waxaa lagaa qaadi lacag dheeraad ah. Khalad u isticmaalida kaarku waxay dirawalka iyo dabagalayaasha ku kalifaysaa in ay xanibaan kaarka. Socdaalada noocan ah waxaa laga soo qaadi mid aan la bixinin lacagtiisa.

Dib u iibso

Dib u iibsashada wax soo saarka iyo tigidhada VL's waxaa la ogolyahay marka ay waafaqaan xeerasha iyo shuruudaha iibsiga iyo socdaalka ee see vl.se

Kaarka socdaalka (Resekortet)

Kaarka socdaalku waa fursad fiican, iyada oo aan loo eegaynin inta aad socdaalayso iyo in aad bas ama tareeen ku socodaalayso. Kaarka waxaaad ka iibsan kartaa xaruntayada macaamiisha ama wakiilka adeega buuxa ee idman waxaadna ku shuban kartaa waxsoo saar dheeraad ah ama/ kharashyada socdaalka.

Ku shubashadda waxsoo saarada

Ku socdaalida mid ka mid ah waxsoo saaradayadu wuxuu ka raqiisanyahay isticmaalka tigidhka halka mar ah. Waxaad ku shuban kartaa kaarka socdaalkasta woxsoo saar dheeraad ah adigoo dalbanaya heerka da'da iyo goobta uu ka shaqaynayo. Sidaa darteed hadii aad rabto in aad isticmaasho dhawr waxsoo saar oo kala duwan waxaa loo baahanyahay in aad haysato dhawr nooc oo kaarasha socdaalka ah.

Hadii aad doorato in aad ku shubato socdaalkaaga. mid ka mid ah kaarashayada socdaalada faraha badan, waxaad helaysaa tiro socdaalo xadidan kuwaas oo aad isticmaalikarto markasta oo aad rabto.

Hadii aad doorato in aad kaarka safarka ku shubato socdaal mudo waxaad socdaali kartaa inta aad rabto mudo xadidan.

Boga xiga ka akhri faah faahinta waxsoo saarkayaga.

Ku shubashada kharashka socdaalka (reskassa)

Kharashka socdaalku wuxuu u shaqeeyaa sida dhariga lacagta laguu rito oo kale kaas oo aad ku bixin karto tigidhkaaga socdaalka baska halka marka aad fuusho baska. Kharashka socdaalku kuuma xadidayo xili gaar ah, wado gaar ah ama da' gaar ah. Kharashka socdaalka uma isticmaali kartid in aad ku raacdo tareen.

Dhawr qof ayaa ku socdaali kara hal kaar

Dhawr qof ayaa ku socdaali karta kaarka socdaalka (Resekortet) hadii aad ku shubtay kaarka socdaalada badan. Ruuxa ku safraya waa in uu jiro da'da loo ogolyahay in uu ku socdaalo kaarkan, ama waa in kaarku uu yahay mid leh qiimaha dadka waawayn. U sheeg dirawalka ka hor inta aadan diwaangalinin si aad ugu soccdaasho si noolka saxda ah looga jaro. Waxay ku xadidantahay baska oo kaliya.

Kaarka socdaalka waxaad ku shuban kartaa halkan

- Bogayga (Mina Sidor) at vl.se
- Xarunta macaamiisha ee xarunta dhexe oo ku taala caasimada Västerås
- Xarunta macaamiisha ee ku taala Vasagatan/Munkgatan ee caasimada Västerås
- Wakiilada idman ee VL's
- Baska korkiisa, kaarka kharash bixinta oo kaliya

Ku shubo waxsoo saarka saxda ah kaar kaaga socdaalka

Shaxadan hoos ku xusan waxay ku tusi waxsoo saarada loogu talo galay dhalinyarta, dadka waawayn ama waayeelka.

Dhalinyarta

Waxaa loogu talo galay dadka da'da u dhaxaysa 7 jir ilaa kahor xuska maalinta dhalashada 20 jirka.

Waxsoo saarka	Tirada socdaalada	Mudada xawilaadda	Socdaalka baska	Socdaalka tareenka	Mudada uu shaqaynayo
Kaarka socdaalada badan, 40 safar	40	1 saac	Haa	maya	Adeega magaalada aad dooratay*
Kaarka socdaalada badan, 10 safar	10	3 saac	Haa	Haa	Jidka xadidan/ goobta
Kaarka koombiitarka 30 cisho	Ma xadidna inta mudada lagu jiro	Ma xadidna	Haa	Haa	Jidka xadidan/ goobta
Kaarka dagmada 30 cisho/ 365 cisho	Ma xadidna inta mudada lagu jiro	Ma xadidna	Haa	Haa	Dagmada Västmanland gudaheeda
Kaarka dhalinyarada	20	2 saac	Haa	Haa	Dagmada Västmanland gudaheeda

** wuxuu ku xadidanyahay dawlada hoose ee Västerås ama adeega caasimada dhaxdeeda ee mid ka mid ah magaalooyinka Fagersta, Köping, Norberg ama Sala.*

Dadka waawayn

Wuxuu ku xadidanyahay da'da ka bilaabanta 20 jir.

Waxsoo saarka	Tirada socdaalada	Mudada xawilaadda	Socdaalka baska	Socdaalka tareenka	Mudada uu shaqaynayo
Kaarka socdaalada badan, 40 safar	40	1 saac	Haa	maya	Adeega magaalada aad dooratay*
Kaarka socdaalada badan, 10 safar	10	3 saac	Haa	Haa	Jidka xadidan/ goobta
Kaarka koom-biitarka 30 cisho/ 365 cisho	Ma xadidna inta mudada lagu jiro	Ma xadidna	Haa	Haa	Jidka xadidan/ goobta
Kaarka dagmada 30 cisho/ 365 cisho	Ma xadidna inta mudada lagu jiro	Ma xadidna	Haa	Haa	Dagmada Västmanland gudaheeda

Waayeelka

Wuxuu ku xadidanyahay da'da ka bilaabanta 65 jir ee ku nool dawlada hoose ee Västerås oo kaliya.

Waxsoo saarka	Tirada socdaalada	Mudada xawilaadda	Socdaalka baska	Socdaalka tareenka	Mudada uu shaqaynayo
Kaarka socdaalada badan, 40 safar	40	1 saac	Haa	maya	Dawlada hoose ee Västerås gudaheeda
Kaarka socdaalada badan, 10 safar	10	3 saac	Haa	Haa	Dawlada hoose ee Västerås gudaheeda
Kaarka koombiitarka 30 cisho	Ma xadidna inta mudada lagu jiro	Ma xadidna	Haa	Haa	Dawlada hoose ee Västerås gudaheeda
Kaarka dagmada 30 cisho/ 365 cisho	Ma xadidna inta mudada lagu jiro	Ma xadidna	Haa	Haa	Dagmada Västmanland gudaheeda

Bogayga (Mina Sidor)

Hadii aad iska diwaangaliso bogayaga vl.se Waxaad heli kartaa faa'iidooyinka dheeraadka ah ee kaarkaaga socdaalka (Resekortet). Akawn ka furashada bogaygu aad ayay u dhib yartahay, wax kharash ah uma baahna si dag dag ahna waad ku samaysankaartaa. Intaa kadib waxaad kaarkaaga socdaalka ka diwaangalinkartaa bogayga adiga oo isticmaalaya lambarka iyo furaha kuyaala dhabarka kaarka. Bogayaga waxaad ku heli kartaa luuqada Swedishka oo kaliya.

Toos ugu shubida kaarka socdaalka

Mar hadii aad kaarkaaga ka diwaangalisay bogayaga, kaarka toos ayaad ugu shubi kartaa. Akawnkaagu waxaa kale oo uu ku tusi wixii aad kaga tagtay ee ku hadhay.

Damaanada kaarka lumay

Kaarkaaga socdaalka ee diwaangashan waxaa ilaalinaya damaanad qaadkayaga lumitaanka kaarka. Tani waxay ka dhigantahay waxaad heli kaar cusub hadii aad ka xanibto bogayaga. Waxaa laguugu shubi wixii ku jiray oo dhan markii aad xanibtay. Laga bilaabo kaarka sadexaad waxaad bixin kharashka maamulka. Ogsoonoow in aadan iska xanibin kaarkaaga hore inta aadan ka cusub helin.

Hal akawn – dhawr kaar oo socdaal

Bogayga waxaad akawnkaaga ku xidhi kartaa dhawr kaar oo ah kuwa sodaalka waxaadna isticmaali kartaa kharashka wada jirka ah ee socdaalka. Tani waxay kuu dhibyaraynaysaa arimaha hadii aad tahay qoys leh kaarar badan, ama hadii aad adiga laftaadu leedahay dhawr kaar.

Waxaad iska diwaangalinkartaa oo aad ka gali kartaa Bogagayga halkan!

Fuulida

Hadii uu basku leeyahay suuumasha, fadlan isticmaal si aad u sugto nabad qabkaaga iyo kan dadka kaleba!

Wadashada caruurtaada

Laba caruur ah oo ka hooseeya 7 jir ayaa bilaash kula raacai kara qofka wayn ee noolka iska bixiyay. Ilmaha sadexaad laga bilaabo waxaa looga baahanyahay tigidhka dhalinyarada. Si loo sugo nabad qabkooda caruurta ka yar 7 jirka looma ogola in ay safraan kaligood.

Qiimayaal kale iyo shuruudo kale ayaa waafaqi kara tareenka. Ka akhri shirkada ay khuayso shuruudaheeda.

Gaadhiga ciyaalka, bakooradaha iyo kuraasta taayirada leh

Gaadhiga ciyaalka, bakooraadaha iyo kuraasta taayiradaleh waa la saari karaa hadii ay meelu u banaantahay. Dirawalka ayaa go'aaminaya waxa la ogolyahay. Waa waajib in ayna dhigin jidka dadku maraan ee u dhaxeeya kuraasta si uuna u jufmin. Waa waajib in markasta lagu xidho xadhko iyo suuman hadii ay jiraan. Ma aha in caaruurta lagaga tago gaadhigooda. Caruurta waa in laga warhayaa markasta inta lagu jiro socdaalka.

VL waxay u hogaansantaa talo bixinta shirkada gaadiidka dadwaynaha ee Swedishka ee ku saabsan kursiga taayirada leh:

- Dherarka guud: 120 cm
- Balaca guud: 70 cm
- Culayska guud: 300 kg, kursiga iyo ruuxa safraya

Wadashada xayawaankaaga

Ayda, bisadaha iyo xayawaanada yarr yari waxay baska ku raaci karaan bilaassh. Waa waajib in ay hogaan ku xidhanyihiin ama ay shabag/salad ku jiraan. Dirawalku wuxuu xaq u leeyahay in uu ku dajiyo hadii xayawaankaagu uu rashbayo rakaabka kale ama shaqaalaha kale. Waxaanu fadhiisinaa xaga u danbaysa rakaabka wata xayawaan, waxaanan galinaa qayb loogu talo galay dadka noocan ah oo kale.

Qof kasta waa in uu dareemaa nasasho

Nabad qabku waa muhiimada koobaad ee basaka iyo tareemada. Sidaas darteed waxaaa jira waxyaabo aynu u baahanahay in aynu fiiro gaar ah siino.

- Goobta basku istaago iyo baska korkiisaba laguuma ogola in aad sigaar ku qiijiso, cabto khamri, aad isticmaasho baranboori ama bushkuleeti, ama saxanka barafka lagu simbiriraxaysto, ama in aad lugahaaga saarto kursiga ama waxyaabaha kale ee dadku isticmaalayaan.
- Qofka cabsan ama is xakamayn Karin looma ogola in uu ka dago baska.
- Kursiga uga kac hadii uu jiiro qof adiga kaa mudan in aad uga kacdo.
- Boorsooyinka waa in la dhigaa meel aan khatar ama dhibaato galinaynin rakaabka kale.
- Waxaa kaliya oo aad baska wax ku dul cuni kartaa hadii aadan kaga dul tagi Karin litirada/ama aadan wax ku dul daadinaynin oo aadan dadka kale dhib u keenaynin.

Wixii qodobo iyo shuruudo ah ee ku saabsan iibsiga iyo socdaalka, eeg vl.se

Xasuusnaw

- Xiliyada mugdiga waxaa haboon in aad isticmaasho wax cawiraya. Kadib ayuu dirawalku ku arki in aad ku sugayso meesha baska lagu sugo. Isticmaalayaasha kale ee wadaduna si fiican ayay kuu arkayaan marka aad ku sii socoto iyo marka aad ka soo socoto meesha basku istaago.
- Amaanka dartiis, basaska socda ama ka ka tagay meesha basku istaago kuuma ogolaanayaan in aad ka dagto ama fuusho.
- Marka ay dhawr bas isku mar istaagaan meesha basasku istaagaan, baska lambar laba horay uma soconayo wuuna istaagi markale. Baska sadexaad iyo kuwa ku xiga waxay dhinaca kale istaagi markale.
- Marka baska la dhigo meesha basasku ugudanbaynta istaagaan, rakaabku waa in ay sugaan inta ayna fuulin. Sababtu waxaa weeye tani waa fursada kaliya ee dirawalku haysto si uu u nasto.
- Sidaa caadiga ah basku wuxuu badalaa calaamaddiisa tilmaanta jidka uu marayo laba daqiiqo ka hor inta uuna socdaalka bilaabin, waxaa kale oo aad ku arki kartaa calaamad leh ma socdo (Ej i trafik) xiliga uu taaganyahay goobta socdaalka basasku ku dhamaadaan.
- Mudada xawilaadda tigidhkaagu waxay kuu sahli in aad badasho baska ama tareenka oo aad bilawdo socdaalka aad ku soo noqonayso.

Ka dagida

Tareenka korkiisa

Hadii aad ku socdaalayso tareen, waxa lagaaga baahanyahay waa in aad hubisaa meesha aad ku dagayso. Tareenku isaga ayaa isjoojinaya meelkasta oo uu istaago.

Baska korkiisa

Hadii aadd bas ku socdaalayso waxaa wadada ku garab yaala calaamado cas oo ay ku qorantahay "STOP". Badhanku wuxuu ku yaalaa meesha gacanta lagu qabsado ama bilifoonka. Hadii aad badhan nabto waxay dirawalka u sheegaysaa in aad rabto in aad ku dagto goobta xigta ee basku istaago.

Marka aa badhanka taabato, fadlan hubi in calaamada joojinta ee "STANNAR" ay iftiimayso baska dhaxdiisa. Hadii aadan hubin meesha iyo goorta aad ka dagayso, fadlan dirawalka waydii si uu kuu caawiyo.

Sida caadiga ah waxaad ka dagi albaabka danbe si aad uga fogaato in aad isjiidhaan rakaabka xaga hore ka soo fuulaya, laakiin tani waxay ku xidhantahay ogolaanshaha dirawalka.

Haddii aad u baahantahay mudo yar

Waxaa kale oo jira badhano kale oo laga istaajiyo baska dhaxdiisa. Waxay noqon karaan cagaar ama buluug leh calaamado kala duwan sida ill, gaaddhia ciyaalka, kursiga taayirada leh ama qof ul wata. Dhamaantood isku wax ayay qabtaan waxaadna isticmaalikartaa marka aad rabto in uu dirawalku sameeyo taxadar markaa aad ka dagayso.

Way fiicantahay in aad ogaato

Autogiro

Hadii aad si joogto ah u safarto, waxaa kuu dhaanta in aad iibsato kaarka socdaalka (Resekortet). Autogiro wuxuu kuu sahlayaa kuuna dhibyaraynayaa in aad bixiso. Tobanka bilood ee u horeeya bikasta waad bixin waxaadnaa heli labada bilood ee u danbeeya. Waxa kaliya ee lagaaga baahaanyahay waa in aad xaqiijiso in akawnkaaga ay lacagi ku jirto labada cisho ee bisha u danbaysa ee ah maalmaha bangigu shaqeeyo.

Autogiro waxaa laga saari karaa koombiitarka dadka waawayn iyo kaarka dagmada, ma aha waayeelka iyo dhalinyarada. Waxaad adigu dooran bisha uu kaarku ka bilaabanayo. Mudada socdaalku waxay markasta ka bilaabmi horaanta bil kasta. Ka mid ahaanshahaaga marwalba oo aad rabto waad tirtiri kartaa.

Waxaa kale oo ku jira damaanada lumitaanka kaarka, taas oo ka dhigan hadii kaarkaagu uu lumo waanu xanibi oo waxaad heli mid cusub. Waxa kharash ah oo dheeraad ahna ma bixinaysid. Kaararka Koombiitarka lagu bixiyay autogiro ma aha in lagu diwaangaliyo Bogayaga (Mina Sidor).

Foomamka codsiga ee autogiro waxaad ka heli kartaa VL's xarunteeda macaamiisha ama waxaad ka dajisankartaa bogayaga ku yaala vl.se. Xasuusnaw. Waxaan rabnaa dalabkaaga kahor 15ka bisha aad rabto in aad bilawdo safarka.

Qodobada iyo shuruudaha iibsiga iyo socdaalka

Qodobada iyo shuruudaha iibsiga iyo socdaalku waxay hagaan waxyaabaha la soo darsa VL iyo macaamiishayada. Waxay khuseeyaan dhamaan socdaalada basaska iyo tareemada ka dhax shaqeeya dagmada Västmanland iyo socdaalada ku wareegsan xuduudaha dagmada kuwaas oo aad ku heshay tigidhka laguu soo saaray ama ay VL kuu ansixisay. Shuruudaha oo dhamaystiran waxaad ka heli kartaa vl.se

Damaanada socdaalka

Waxaan rabnaa in aad qabto kalsooni in aad si nabad ah u gaadhayso meesha aad tagayso marka aad na raacdo, laakiin wax way khaldami karaan. Tusaale ahaan, basku wuu xumaan karaa ama dirawalka ayaa xanuunsankara. Hadii ay ku saamayso, waxaan trabnaa in aan samayno sida saxda ah. Sidaass darteed waxaan leenahay damaanad socdaal. Warqada damaanada socdaalka waxaad ka heli kartaa wakiiladayada idman ama waxaad ka soo dajisankartaa bogayaga vl.se
Waxaan kaa codsanayaa in aad na soo gaadhsiiso arjigaaga magdhawga mudo aan ka danbaynin hal bil dhacdadu markii ay dhacday.

Waxaa kale oo aad ka akhrisan kartaa xuquuqdaada rakaab ee tareenka:

→ http://europa.eu/youreurope/citizens/travel/passenger-rights/index_sv.htm

! Tilmaantan waxaa labixiyay iyada oo wax ka badalmi karaan khaladaad daabacaadina jiri karo.

Naga caawi in aan wax hagaajino

Waxaan danaynaynaa waxa aad ku fikirayso! Sidaass darteed fadlan nagala soo xidhiidh vl.se ama xaruntayada daryeelka macaamiisha. Waraaqaha fikir uruurintu waxay yaalaan xarunta macaamiisha halkaas oo aa ku qori karto fikirkaaga. Halkaa ugu dhiib ama noo soo dir adiga oo aan bixinin wax kharash ah. Waxaad ku heli kartaa luuqada Swedishka iyo Englishka.

vl.se • xarunta macaamiisha VL 0771-22 40 00

Version 1 - Somaliska